



UJEEDDO KIRO 2 QOL OO GANACSI AH.

Maanta oo ay taariikhdu tahay **12/01/2022**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa Xafiiskeyga iigi yimid Mudanayaasha Soomaaliyeed ee kala ah :-

B-Anigoo ah Cali-kaafi Xaashi Saciid, Somali ah hooyo Maryan Diirshe Sabriye ku dhashay G/kacyo 1975 Sita Somali Passpor No.P00829633, Waxaan qoraalkan aan ku caddeynayaa anigoo xiskeygu uu taam yahay cidna I khasbin in aan ka kireeyey **Cabdi Siyaad Khayre**, 2 qol oo ganacsi ah oo ku yaal Xamar Degmada H/wadaag "Soone Masjidka Xareed" waxaana kula heshiiyey **Cabdi Siyaad Khayre** qodobada soo socda oo kala ah:-

- 1- Bishii waxaan uga kireeyey \$300 "Sadax Boqol oo dollar"
- 2- Wuxuuna ii hormariyey 36 bilood kiradood oo dhan US\$.10,800/=
- 3- Kirada waxey bilaabatey 12/01/2022 waxayna ku eg tahay 10/01/2025
- 4- Kireystaha dad kale kama sii kireyn karo
- 5- Wixii adeeg ah sida nadaafadda, intenetka, korontada, biyaha iwm waxaa iska bixinaya kirestaha
- 6- Markii heshiiskan uu dhamaado labadeena dhinac waxaa noo furan in aan heshiiskan sii wadno ama aan iska dhaafno.

T-Anigoo ah Cabdi Siyaad Khayre, hooyo Xabiibo Cilmi Xalane ku dhashay G/kacyo 1969 sita B/port No.P00953723 waxaan dhinaceyga aan caddeynayaa in heshiiska 2 qol ee kirada ah aan kula heshiiyey **Cali-kaafi Xaashi Saciid** ee sare lagu soo xusey ay sax tahay oo aan ku qanac-sanahay oo raalli ka ahay.

SAXIIXA KIREEYAH

CALI-KAAFI XAASHI SACIID

SAXIIXA KIREYSTAHA

CABDI SIYAAD KHAYRE

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1-Maxamed C/raxmaan C/llaahi

2- Cali Xasan Maxamed

Rep.051/TPN/2022 (CADDEYNTA NOOTAAYAHA)

Tr. 12/01/2022

Anigoo ah Nootaayaha Tayo, **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'edc Nootaayo"** waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa **1- CALI-KAAFI XAASHI SACIID** (ahna Kireeyaha Guriga) **2- CABDI SIYAAD KHAYRE** ahna (Kireystaha) iyo waliba Labada Nin ee Soomaaliyeed oo dhanka maragga ka caawiyey oo kor ku xusan, Dadkaan oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadaas ay leeyihiin waxay heshiiskan igula saxiixeen Xafiiska iyaga oo xis qaba raalina ah, Caafimaad qaba, Xiskooduna taam yahay, Cid khasbeysana aysan jirin, Waana Kiro ansax ah oo Waafaqsan Shareecada Islaamka



NOOTAAYAHA

(Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo")

MASAWIRKA KIREEYAHA

CALI-KAAFI XAASHI SACIID



MASAWIRKA KIREYSTAHA

CABDI SIYAAD KHAYRE



MASAWIRADDA MARKHAATIYAASHA

MAXAMED C/RAXMAAN C/LLAHI



CALI XASAN MAXAMED



